

Dadka isku arka calaamadaha cudurka oo keliya ayaa tijaabo iska qaadaya

Dawladdu waxay joojinaysaa taladii ahayd dadka guriga deggan iyo dadka xiriirka dhow la leh in ay tijaabo iska qaadaan marka qof ay u dhowaadeen cudurka laga helo. Dadka waaweyn waxay hadda tijaabo iska qaadayaan keliya marka ay isku arkaan calaamadaha cudurka, meesha aan carruurta dhigata xannaanada carruurta iyo ardayda looga baahnayn in ay tijaabo iska qaadaan. Wax-ka-beddelistu waxay dhaqangelaysaa laga billaabo sabtida 12-ka febraayo, saacadda 10.00.

-Maaddaama aan omikroonku xanuun halis ah ku keenin dadka intooda badan, ayaan joojinnaynaa taladii ahayd dadka guriga deggan iyo dadka xiriirka dhow la leh in ay tijaabo iska qaadaan. Dadka waaweyn ee isku arka calaamadaha cudurka weli tijaabo ayay iska qaadayaan, meesha aan carruurta dhigata xannaanada carruurta iyo ardayda looga baahnayn in ay tijaabo iska qaadaan, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol. Waxay marka danbe dawladdu eegi doontaa in tijaaba-qaadka loo beddelo waxa loogu yeero tijaaba-qaad ay fulinayaan shaqaalaha caafimaadka, halkaas oo adeegga caafimaadku go'aaminayo cidda tijaabada laga qaadayo sida cudurrada infakshannada kale.

Goobaha caafimaadka ee degmooyinka iyo isbataallada ee uu covid-19-ku halista weyn u soo jiidayo, ayagaa go'aansan kara in ay si joogto ah tijaabo uga qaadaan shaqaalaha iyo bukaanka. Waxaa sidoo kale laga fikiri karaa in tijaabo laga qaado dadka booqashada ku imaanaya qaybaha ay ku jiraan bukaanka- iyo dadka adeegga isticmaala ee sida gaarka ah u nugul.

Raadraaca cudurka waa la joojinayaa

Ilaa iyo maanta qofka cudurka laga helay ayay ku xirnayd in uu wargeliyo dadkii uu u dhowaaday. Taas hadda waa la joojinayaa. Waxaa si kastaba raadraaca u baahan kara degmooyinka uu cudurku ka dillaaco sida marka uu ka dillaaco xarummaha degmada.

–Marka uu dad sidaan u badan cudurku ku dhoco, waxaa yaraanaya muhiimadda raadraaca cudurka. Midda ugu muhiimsan ayaa waxay hadda tahay in ay dadka jirran guriga joogaan, iyo in aan iska kaashanno ilaalinta kooxaha halista gaarka ah ku jira haddii uu cudurku ku dhoco, ayay tiri Kjerkol. Dadka halista gaarka ah ku jira haddii uu cudurku ku dhoco caadiyan si wanaagsan ayay u difaacan yihiin haddii ay tallaalka qaateen. Dadka halista weyn ugu jira in ay aad ugu xanuunsadaan haddii uu cudurku ku dhoco waa in ay dhakhtarka kala tashadaan halista ay ku jiraan, iyo in loo baahan yahay in ay si gaar ah isu ilaaliyaan mararka uu cudurku badan yahay.

–Laakiin waa muhiim in aan la is qoqobin, ee bulshada xiriir lala lahaado, ayay tiri Kjerkol.

Waajibkii gooni-u-bixidda waxaa lagu beddelayaa in guriga la joogo

Ilaa iyo hadda qofka cudurka laga helo waxaa waajib ku ahayd in uu gooni u baxo marka tijaabo laga qaado oo cudurka laga helo. Waxyaalaha waajibka ku ah qofka cudurka laga helay waxaa ka mid ahaa in uu laba mitir u jirsado dadka kale ee guriga la deggan iyo in uu isticmaalo suuli gooni ah haddii ay suurtaggal tahay.

Waxay hadda dawladdu taas ku beddelaysaa talo ah in afar maalin guriga la joogo, oo aan shaqada lagu laaban ayada oo aan xummad-la'aan la ahayn ugu yaraan 24 saac. Laakiin looma baahna in qofku haysto suuli gooni ah ama uu ka fogaado dadka kale ee guriga la deggan.

–Gooni-u-bixiddu waa tillaabo nololsha qofka xaddidaysa, sii jiritaankeeduna munaasib ma ah marka la eego xaaladda cudurka ee maanta. Si loo xaddido sii faafidda cudurka oo hadda aad loo kala qaadayo, ayaa waxaa weli loo baahan

yahay in lagu taliyo in afar maalin guriga la joogo kaddib marka qofka tijaabo laga qaado oo cudurka laga helo, ayay tiri Kjerkol.

Carruurta dhigata xannaanada carruurta iyo ardayda iskoollada waxaa lagu talinayaa in ay guriga joogaan haddii ay xanuunsan yihiin, laakiin loogama baahna in ay tijaabo iska qaadaan. Waxay iskoolka iyo xannaanada carruurta aadi karaan marka ay xummad-la'aan ahaayeen 24 saac. Taas oo gacan ka geysan doonta in uu yaraado maqnaashada shaqada ee waalidka iyo shaqaalaha.

-Carruurta iyo dhallinyaradu inta badan cudurka aad uguma xanuunsadaan, ilaa iyo inta suurtaggalka ahna waa in aan ka ilaalinnaa dhibka uga imaanaya in ay ka maqnaadaan saaxiibbada, iskoolka iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay, ayay tiri Kjerkol.